# Booqashada Awoowaha iyo Ayeeyada

**Grandparents and Visitation**




## Waxa aad doonayaa inaa waqti la qaato ilmaha aan aawoodaha ama ayeeyada u ahay. Xaq ma u leeyahay inaan saa sameeyo?

Waqti la qaadadka ilmaha aad awoowaha ama ayeeyada u tahay ma aha xaquuq hubaal ah. **Hadii** waalid ama mas'uulku uusan kuu ogolayn inaad waqti la qaadato ilmaha aad awoowada ayeeyada u tahay, waxaa jira waxyaabo aad isku dayi karto si aad u aragto iyaga.

## Maxkamada la'aanta

Hadii aad awoodo, isku day inaad la heshiiso waalidka kale. U sheeg dareenkaaga iyo inaad doonayso inaad qayb ka noqoto nolosha ilmaha aad awoowaha ama ayeeeyada u tahay. Waxaad kaloo isku dayi kartaa inaad isticmaasho dhexdhexaadiye kaala shaqeeya qorshe hadii waalidku ay diyaar u yihiin. Waxaa jira dhexdhexaadin lacag yar oo la heli karo.

- Rugta Xalinta Khilaafaadka (Conflict Resolution Center):
  Tel. 612-822-9883
  http://crcminnesota.org/mediation-conflict-coaching/

- Rugta Xalinta Muranada (Dispute Resolution Center): dadkad degan Dagmooyinka Dakota, Ramsey, iyo Washington.
  Tel. 651-292-7791
  http://disputeresolutioncenter.org/services/mediation/

Laakiin marmarka qaarkood, aadida maxkamadi waa waxa kaliya oo banaan.

## Aadida Maxkamad

Hadii aad heshiis aydnaan ka wada shaqeyn karin waalidka, waxaa aad ka codsan kartaa maxkamadi inay ku siiso waqti booqasho. Maxkamadu kaliya waxa ay tixgelisaa codsiga awoowaha iyo ayeeyada hadii ay ku leedahay "maslaxad" arrinta ilmaha. Waxyaabaha muujinaya inaad maslaxad kuugu jirto arrinta ilmaha hoos ayaa lagu xusay.

1. Ilmo aad adigu dhashay inuu yahay mid labada waalid uuna ilmahaagaasi uu geeriyooday.

2. Dacwadaha qoyska sida furiinka, haysashada ilmaha, kala bixida waalidka ee sharciga ah, burinta ama aabanimada.

   – Tusaalaha 1: ilmahaaga waxaa u socoto dacwo furiin ama kiis ilmo hayn ah. Waxa aad waydiisan kartaa Maxkamada inay ku siiso xaquuq booqasho iyadoo qayb ka ah kiiska furiinka ama haysashada ilmaha ee u dhaxeeya waalidka.

   

   – Tusaalaha 2: Ilmahaagu jaa dacwadii furiinkiisu waa ay dhamaatay ama waxa uu u aaday maxkamad dacwo haysasha ilmaha ah. Waxaa aad ka xareysan kartaa dacwo isla maxkamadaa kiisku ka furan yahay si aad u waydiisato xaquuq booqasho in lagu siiyo.

   – Tusaalaha 3: Ilmahaaga iyo waalidka kale waxa ay saxiixeen Warqada Qirashada waalidnimada waxa ayna ka xareeyeen xafiiska gobolka ee diiwaangelinta qoraalada muhiimka ah, laakiin wax dacwo haysasho ilmo ah lagama xareyn maxkamad qoys. Waxa aad bilaabi kartaa kolkaa dacwo maxkamadeed waxa aadna maxkamada waydiisan kartaa inay ku siiso xaquuq booqasho.

3. Hadii ilmahu uu adiga kula noolaa sanad ama ka badan ka dibna ilmaha waalidkii kaxaystay.

4. Hadii ilmaha aad awoowaha u tahay labada isqabtaa qofka aan dhalin uu korsi u qaato, iyo:

   - Ilmahaagu uu ahaa labada waalid midkood uuna ilmahaagii geeriyyday, ama

   - Xaquuqdii waalidnimo ee ilmahaaga laga qaaday sababtoo ah ilmaha aad awoowaha/ayeeyada ah waa ilmo la korsaday.
     – Tusaale ahaan: ilmahaagu furiin ayuu maray, qofkii ay horey isu qabi jireena dib ayuu u guursaday. Ilmahaagu waxa uu ogolaaday in qofkii horey ay isu qabi jireen qofka cusub oo ay is guursadeen uu qaadan karo ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay. In kastoo ilmahaagu kolkaa uusan waalid sharciyeysan u ahayn ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay, waxa aad waydiisan kartaa booqasho ilmaha aad booqanayso adigoo awoowe/ayeeyo ah.

## Sidee maxkamada u tusaa inaan helo booqasho ilmaha aan awoowaha/ayeeyada u ahay?

Maxkamadu kaliya waxa ay u ogolaataa booqshada awoowaha/ayeeyada hadii ay tahay taasi maslaxada ilmaha **<u>iyo</u>** hadii aysan faragashanayn xiriirka waalidka iyo ilmaha ka dhaxeeya.

Waxaad u baahan tahay inaad tusto maxkamada inay tahay maslaxada ilmaha inaad booqato iyaga **iyo** inaad u cadeyso, shaki la'aan, in booqashadu aysan faragelinayn xiriirka waalidka iyo ilmaha ka dhaxeeya.

## Waa maxay “Kalmada Maslaxada” macnaheedu?

Ma jiro hal jid oo loo qeexi karto eraygan. Maxkamadu waxa ay eegtaa xiriirka aad la leedahay ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay iyo waxa aad sameysay si aad qayb uga noqoto nolosha ilmaha.

- Ma soo wacdaa, booqataa, waqtina ma la qaadataa ilmaha?
- Ma taqaan waxa ilmahu uu jecel yahay?
- Ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay ma ka helaa waqtiga aad wada qaadataan?
- Ma ka caawisaa ilmaha iskuulka ama ma isku daydaa inaad ka caawiso waxbarashada?

## Hadii ilmaha aan awoowaha/ayeeyada uu qaatay qof kale oo aan ka ahayn qofka ay waalidkii isqabaan?

- Hadii ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay uu adiga kula noolaa ka hor inta aad cid la siin AMA ay qaateen ehelo ayna labada qof oo ilmaha dhalay ay labaduna dhinteen, kolkaa waxa aad ka codsan kartaa maxkamada “heshiiska wada xiriirida.” Arrintani waxa ay sameysaa nooca u yahay xiriirka aad la yeelan karto ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay mustaqbalka. Heshiiskani waa khasab in lagu qoro amar maxkamadeed waana in tan la sameeyo ka hor amarka kama dambaysta ah ee ilmo korsiga. Waa ra’yi wacan inaad arrintan kala hadasho qareen.

- Hadii ilmaha ay qaataan si ay u korsadaan cid kale oo aan ka ahayn qofka ay is qabaan waalidka ilmaha dhalay, ma booqan kartid hadii dadka ilmaha korsanayaa aysan ogolaan.

## Ma u baahnahayn qareen si aan u helo amar booqasho ii ogolaanaya?

Uma baahnid qareen si aad u hesho amar booqasho kuu ogolaanaya, laakiin waa ra’yi wacan. Hel qareen khidbrad u leh xeerka qoyska, gaar ahaan xaqa booqashada awoowaha/ayeeyada.

## Ma codsan karaa inaan booqdo ilmaha aan awoowaha/ayeeyada u ahay hadii labada waalid ee dhalay ilmahu ay wali wada joogaan?

Hadii ilmaha aad awoowaha u tahay labada waalid ee dhalay ay wali isqanaan, uusana ilmahu adiga kula noolayn sannad, maya, ma tagi kartid maxkamad si aad u codsato booqasho.



Hadii ilmaha aad awoowaha u tahay waalidkii dhalay aysan isqabin laakiin ay qoys ahaan u wada nool yihiin ilmaha aad awoowaha u tahay, waa aadi kartaa kolkaa maxkamad si aad u raadiso booqasho LAAKIIN kaliya hadii ay saxiixeen Qirashada Waalidnimada (ROP) ayna ka xareeyeen xafiiska gobolka ee diiwaangelinta qoraalada muhiimka ah.

Eeg qaybta “Aadida Maxkamada” ee kor ku xusan si aad uga hesho akhbaar dheeraad ah.

## Sidee ayaan ku cadeyn karaa inaan xiriir la leeyahay ilmaha aan awoowaha u ahay hadii waalidku aysan ii ogolayn inaan waqti la qaato ilmaha?



Waa khasab inaad cadeyso inaad aad ugu dadaashay inaad isku daydo inaad la yeelato xiriir ilmaha aad awoowaha u tahay. Maxkamadu waxaa dhici karta inay eegto dhowr waxyaabood si ay u ogaato inaad taa sameysay iyo in kale.

Taa waa aad sameyn kartaa adigoo u diraya salaanta dhalashada iyo hadiyado. Waxaad kaloo u qori kartaa warqado. Waa aad wici kartaa iskuna dayi kartaa inaad ogaysiiso inaad jeceshahay.

Ku dadaal intii aad awoodo inaad wanaag ka sheegto waalidka, xataa hadii aydnaan heshiis ahayn. Ha dareemsiin ilmaha aad awoowaha u tahay inuu mid doorto waalidkii ama awoowgii/ayeeydii. Maxkamadu waxa ay doonaysaa inay aragto in ilmaha aysan jir ahaan ama qalbi ahaan wax u yeelayn booqashadaada uu adiga ku soo booqanayo.

## Ka waran hadii waalidku ay si wayn uga soo hor jeedaan inaan arko ilmaha aan awoowaha u ahay?

Maxkamadu waxay si weyn tixgelisaa waxa ay waalidku doonayaan waxa ayna eegtaa sababta ay waalidku aysan u rabin inaad adiga booqato ilmaha aad awoowaha/ayeeyada u tahay. Maxkamadu waxa ay eegi kartaa waxa idin dhex maray adiga iyo waalidka. Tani kuma wada filna, laakiin waxay ka noqon kartaa qayb.

Arrimahu waa kala duwanaan karaan. La hadal qareen hadii aadan hubin xaalada taada.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**